



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS

Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7aad	Kulanka: 4aad
Taariikhda: 20/10/2025	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:40 AM	Saacadda uu Xirmay 13:13 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Senator Cabdullahi Cali Xirsi (Timacade) Guddoomiye ku xigeenka 2aad Golaha Aqalka Sare.	Guntanka Kulanka: 28 Senator
Martida Kulanka: Wasiiru Dowlada Wasaaradda Arrimaha Gudaha Mudane Sadaad Maxamed Nuur	Ajandayaasha Kulanka: - Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka - Ansixinta Ajandaha - Akhrinta 1aad ee Hindise-sharciyeedka Dad dhigista iyo Xaaladaha Madaniga ah. - Sii wadista ka doodista Warbixin ku saabsan ka talo bixinta kaalinta Aqalka Sare ee Arrimaha Dowladaha Xubinta ka ah Dowlada Federaalka ah ee Soomaaliya.

Furitaanka Kulanka:

Kulan ka waxaa lagu furay ayaadaha qur'aan ka kariima waxaana akhriyay Senator Xasan Xuseen Xaaji.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha ku xigeenka labaad ee Golaha Aqalka Sare Senator Cabdilaahi Cali Xirsi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 27 Senator Aamusnaansho: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiye ku xigeenka labaad ee Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Wasiiru Dowlada Wasaaradda Arrimaha Gudaha Mudane Sadaad Maxamed Nuur si uu Golaha ugu soo horjeediyo warbixinta Akhrinta 1^{aad} ee Hindise-sharciyeedka Dad-dhigista iyo Xaaladaha Madaniga ah. Warbixinta wasiirka kaddib, 13 Senator ayaa soojeedin iyo dood ka yeeshay warbixin ku saabsan ka talo bixinta kaalinta Aqalka Sare ee Arrimaha Dowladaha Xubinta ka ah Dowlada Federalka ah ee Soomaaliya.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta ajanadaha kulanka.
2. Guddoomiye ku xigeenka labaad ee Golaha Aqalka Sare ayaa faray maamulka Golaha in Hindise-sharciyeedka Dad-dhigista iyo Xaaladaha Madaniga ah loo gudbiyo Guddiga ku shaqada leh si ay uga gutaan waajibkooda ugana soo diyaariyaan warbixinta akhrinta 2aad.
3. Guddoomiye ku xigeenka labaad ee Golaha Aqalka Sare ayaa xubanaha golaha u sheegay in doodka Warbixin ku saabsan ka talo bixinta kaalinta Aqalka Sare ee Arrimaha Dowladaha Xubinta ka ah Dowlada Federalka ah ee Soomaaliya la siiwado.

Ugu dambayntii, Shirgudoonka kulanka Cabdullahi Cali Xirsi (Tima cadde) ahna Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa kulanka Soo xiray sacadu markay ahayd **13:13 PM**.

DHAMAAD